# Istaraatiijiyada Lidka-cunsuriyada Qaranka

## Waxa Istaraatiijiyada ku saabsan tahay

Sanadii 2011, Xukuumada Australia waxay ku dhaqaaqday abuurista Istaraatiijiyada Lidka-cunsuriyada Qaranka

Ujeedada Lidka-cunsuriyada Qaranka waa:

Si kor loogu qaado fahamka bulshada Australia macnaha cunsuriyada, iyo sida looga hortegi karo laguna yarayn karo.

Ujeedooyinka istaraatiijiyadu waa in:

- La abuuro ogaanshaha cunsuriyada iyo sida ay wax u yeesho shakhsiyaadka iyo bulshada guud
- In la aqoonsado, kor loo qaado lana dhiso waxqabad la taaban karo si looga hortago loona yareeyo cunsurnimada, iyo
- In awood la siiyo bulshooyinka iyo shakhsiyaadka si loo qaado talaabo lagaga hortegayo laguna yaraynayo cunsurnimada si loo hello caawimo markii ay dhacdo.

Istaraatiijiyada waxaa lagu sameeyey wada shaqayn uu hogaaminayo Gudoomiyaha Takoorida Jinsiyada (Race Discrimination Commissioner) oo ka tirsan Guddiga Xuquuqda Aadamiga Australia (Australian Human Rights Commission). Xubnaha kale ee hawlwadaaga ahi waa: Wasaarada Immigrayshanka iyo Muwaadinimada, Wasaarada Xeer-ilaaliyaha Guud, Wasaarada Qoysaska, Gurisiinta, Adeegyada Bulshada iyo Arrimaha Dadka Asaliga ah, Golaha Dadka Dhaqamada Kala duwan, Kongareeska Qaranka Australiankii ugu soo horreeyey iyo Isutagga Bulshooyinka Qawmiyadaha Golayaasha Australia.

Istaraatiijiyada waxaa la hirgelin doonaa inta u dhexaysa Juulay 2012 ilaa Juun 2015. Waxayna diirada saari doontaa wacyigelinta dadweynaha, waxbarashada xogaha iyo hawlgelinta dhalinyarada.

## Waa maxay cunsurnimadu?

Cunsurinimadu waxay yeellan kartaa wajiyaal badan, sida kaftan ama oraah dhihid taas oo sababta dhaawac; ugu yeerida magac la dhibsado ama hadal aflagaado ah, dhibaatayn ama handadaad, ama faallo warbaahinta iyo online lagu soo qoro taas oo siyaadisa cadaawada ku aadan kooxa gaara. Kuwooda ugu daran, cunsurnimadu waxay keeni kartaa waxyeella jireed iyo rabshad.

Cunsuriyadu waxay ka reebi kartaa dadka inay hellaan adeegyo ama ka qaybgelaan shaqada, waxbarashada, cayaaraha iyo xarakaadyada mujtamaca. Waxay kaloo ka dhici kartaa heerka xukuumiga ah xagga nadaamka ama waxqabadyada oo aan u roonayn kooxaha qaarkood.

Cunsuriyadu waxay keentaa u sinaan la'aanta fursadaha, khayraadka ama awooda jinsiyadaha kala duwan. Aaminsanaanta in jinsi gaar ahi dadka ka hooseeyo ama ka koreeyo kuwa kale ayaa mararka qaarkood la isticmaalaa si loo sababeeyo sinaan la'aanta.

## Yaa la kulma cunsuriyad Australia gudaheeda?

Dabeecada cunsurnimada, sida magac aan munaasib ahayn ugu yeerida iyo haaraamidu, waxay ka dhexdhici kartaa xubnaha jinsiyad walba. Si kasta ha ahaatee, dadka qaarkiis ku nool Australia ayaa u nugul cunsuriyada iyo takoorida, khaasatan dadka Aborijiniska ah iyo kuwa ka yimid Torres Strait Island iyo jinsiyadaha laga tirada badan yahay. Xubnaha diimeed ayaa badankood la kulma takoorid sabab la xiriira jinsiyadooda iyo dhaqankooda.

## Dhegaysiga bulshada

Waxaan la hadalay dad badan oo ku kala nool Australia oo dhan intii u dhexaysay bisha Maarso ilaa May 2012:

- Ugu yaraan 700 oo qof ayaa ka qaybgalay 23 wadatashi
- Waxaan hellay in ka badan 1500 oo sahan oo elektaroonig ah iyo qoraalla la soo qadimay oo gaaraya 200.

Fariinta ugu culus oo aan hellay waxay ahayd in talaabo ka qaadida cunsuriyadu tahay mid muhiim ah.

Waxaa kaloo jiray heshiis guud oo ku saabsan meelaha ay tahay in wax laga qabto, kuwaas oo ay ku jiraan:

- Goobaha shaqada
- Warbaahinta
- Dugsiyada iyo waxbarashada sarre
- Adeegyada dawlada
- Online-ka, iyo
- cayaaraha.

## Cunsuriyada – inaga nama dhaafsiisna

Istaraatiijiyadani waxay ugu yeeraysaa dhamaan xubnaha bulshada Australia inay ka shaqeeyaan soo afjarida cunsuriyada. Cunsuriyadu waxay ku joogsanaysaa talaabooyinka aan qaadno shakhsi ahaan iyo koox ahaan.

## Waxaan samayn karo

*Samaynta wacyi gelinta iyo saamaynteeda shakhsiyaadka iyo bulshada.*

- Daahfurida olole lagu abuurayo wacgelin dadweyne iyo wixii aan ka samayn karo.
- In aan la shaqayno hogaamiyayaasha kuwaas oo hormarin doona istaraatiijiyada iyo waxqabadkeeda.
- Kor u qaadida cilmi baaris ku saabsan cunsuriyada si loo siyaadiyo ogaanshaha saamaynteeda.

*Dhisida tusaalayaal wanaagsan si looga hortago cunsurinimada*.

- Kaalmaynta nadaamyada iyo qaanuunada hormarinaya ixtiraamka iyo sinaanta dadka Australia ku dhaqan guud ahaan jinsiyaday doonaan ha ahaadeene.

- Abuurista websayt leh xog wanaagsan oo waxbarasho kuna saabsan cunsuriyada, iyada oo diirada la saarayo dhalinyarada.
- La shaqaynta ururada iyada oo mudnaanta la siinayo dhinacyada kaalmeeya ujeedooyinka wanwanaagsan oo wax ka qabanaya cunsuriyada.
- Dhisida wada shaqaynta heerarka kala duwan ee xukuumada iyo ururada aan xukuumiga ahayn si loo kaalmeeyo da'daalada wanaagsan ee heerarka qaran, heerarka goboleed iyo kuwa maxaliga ah.

*Siinta shakhsiyaadka iyo bulshada fursada ay ku hellaan macluumaad iyo xog ku saabsan cunsuriyada, si ay u yeeshaan kalsooni wanaagsan oo ku saabsan xagga waxa la samaynayo markay dhacdo*.

- Horumarinta xogta kaalmaysa shakhsiyaadka iyo bulshada si ay wax uga qabtaan cunsuriyada ururada iyo nadaamka.
- Siinta macluumaad shakhsiyaadka iyo bulshada khatarta ugu jirta cunsuriyada si loo hello xafidida sharciga.

**Fulinta Istaraatiijiyada**

Istaraatiijiyada Lidka-cunsuriyada Qaranka ayaa la hirgelin doonaa iyada oo heer-heer ah saddexda sano ee soo socota.

**Laga bilaabo Juulay 2012:** Waxaanu daahfuri doona ololaha wacyigelinta dadweynaha ee cunsuriyada. Waxaanu diirada saari doonaa dhisida wacyigelinta bulshada dhinaca cunsuriyada iyo horumarinta cilmi baaris lagu sameeyo saamaynteeda bulsho iyo dhaqaale. Waxaan eegaynaa sidii aan u caawin lahayn barnaamijyada jira kuwaas oo isku daya hoos u dhigida cunsuriyada iyo horumarinta ixtiraamka iyo sinaanta.

**Laga bilaabo Juulay 2013:** waxaanu abuuri doonaa websaytka xogta waxbarashada lidka-cunsuriyada waxaanuna bilaabi doona ururinta xog wanaagsan si loo kaalmeeyo shakhsiyaadka iyo bulshada iyo aqoonsiga sidii wax looga qabanayo cunsuriyada. Waxaanu bilaabi doonaa la shaqaynta ururada meelaha aanu xiisaynayno si loo aqoonsado habka wanaagsan oo hoos loogu dhigi karo cunsuriyada ururada iyo nadaamka.

**Laga bilaabo Juulay 2014**: Iyada oo la isticmaalayo xogaha aanu ururinay oo horamarinay, waxaanu kala shaqaynaynaa kuwa aan hawlwadaaga nahay si loo caawimo shakhsiyaadka iyo bulshooyinka si ay wax uga qabtaan cunsuriyada.

Dhammaadka saddexda sano, Istaraatiijiyada Lidka-cunsuriyada ayaa la qiimayn doonaa.

**Ka qaybqaado**

Xoghayaha Istaraatiijiyada Lidka-cunsuriyada

Wac: 02 9284 9600 ama 1800 620 241 (TTY)

Email: antiracismsecretariat@humanrights.gov.au

Web: www.humanrights.gov.au/antiracism

Cinwaan: GPO Box 5218 SYDNEY NSW 2001

Guddiga Xuquuqda Aadamiga Australia wuxuu xaliyaa cabashooyinka ka imanaya dadka ay qabsatay takoorid cunsuriyadeed.

Talasiin lacag la'aana oo la xiriirta takoorida iyo xuquuqdaada, ama inaad dacwad samayso, wac Guddiga Khadka Macluumaadka Dacwada **02 9284 9888**, **1300 656 419** (wicida agagaraha) ama **1800 620 241** (TTY).

Macluumaad ku saabsan samaynta ama ka jawaabida dacwada ayaa laga heli karaa www.humanrights.gov.au.
Waxaad kaloo email u diri kartaa Guddiga complaintsinfo@humanrights.gov.au.